ICRC

Soomaaliya

Feberaayo 2026



# Xaqiiqooyinka iyo Tirooyinka 2025

Guddiga Caalamiga ah ee Laanqayrta Cas (ICRC) waa urur aan eexan, dhexdhexaad ah oo madax bannaan iyadoo la aasaasay sanadkii 1863-dii ayaa hawshiisa bani'aadamnimo kaliya ah ay tahay in uu dhowro nolosha iyo sharafta dhibbaneyaasha colaadda hubaysan, xaaladaha kale ee qalalaase iyo, sidoo kale in uu siiyo gargaar. ICRC waxay kaloo ku dadaashaa in ay ka hortagto dhibaatada iyadoo horumarineysa xoojeneysana xeerka bani'aadamnimada iyo mabaadi'da caalamiga ah ee bani'aadamnimada.

Iyadoo howshhii ugu horreysay ee ICRC-da Soomaaliya ay soo bilaabatay sannadkii 1942-dii, waxay si joogto ah dalka u joogtay tan iyo sanadkii1977-dii, heshiis ay dowladda kula jirto. ICRC waxay ka hawlgashaa Soomaaliya iyadoo adeegsanaysa shabakad ka kooban 12 xafiis oo ku kala yaala Muqdisho, Hargeysa, Boosaaso, Garoowe, Gaalkacyo, Dhuusamareeb, Beledweyne, Jowhar, Xudur, Baydhabo, Kismaayo iyo Dhoobley iyo xafiis taageero ah oo ku yaala Nairobi. Waxay hawlo firfircoon ka wadaa meelaha ay sida aadka ah u saameeyeen colaadaha hubaysan iyo qalalaasaha, goobaha ay ka hawlgashana waxay si dhow ula shaqeysaa dadweynaha. Kooxda ICRC-da Soomaaliya waxay ka kooban tahay 334 shaqaale oo ay ku jiraan 45 shaqaale caalami ah.

ICRC-du waxay si dhow ula shaqeysaa Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed (SRCS) iyo qaybaha kale ee Dhaqdhaqaaqa Caalamiga ah ee Laanqayrta Cas iyo Bisha Cas oo ka shaqeeya Soomaaliya. Waxay la hadashaa dhammaan dhinacyada colaadaha ku lugta leh waxayna si dhow oo hufan ula shaqaysaa dhammaan maamullada heer degmo, gobol, heer Dowlad-goboleed iyo heerarka federaalka. Iyadoo ka madax banaan nidaamka Qaramada Midoobay, ICRC-du waxay howlaheeda si dhow iskula dubaridaa ururrada kale ee bani'aadamnimada ka shaqeeya.



Abdikarim Mohamed/ICRC

Tan iyo sannadkii 1977-dii ICRC-du waxay booqanaysay dadka xorriyadooda laga qaaday ee ku jira xabsiyada Soomaaliya. Xabsiyadan ayaa isugu jira, saldhigyo boolis iyo hey'adaha ammaan dowladda. Ujeedada booqashooyinka ayaa ah in lahubiyo in maxaabiista loo dhaqmo si bini'aadamnimo leh iyo xaaladaha xabsiyada dhammaan maxaabiista, iyada oo aan loo eegin sababha ay u xiranyihiin.

## Hagaajinta xaaladaha nolololeed iyo la dhaqanka maxaabiista

- **5,102 maxaabiis ah** ayaa xaaladdooda lala socday iyada oo loo marayo **56 booqasho** oo lagu tagay **20 xabsi**, oo ujeedadoodu tahay hagaajinta xaaladaha iyo la dhaqanka maxaabiista.
- **4,904 maxaabiis ah** ayaa helay taageero cunto inta Ramadaanka lagu jiro si afurka loogu dhammeystiro **15 xabsi**.
- **4,794 maxaabiis ah** ayaa helay agabka nadaafadda, halka **4,625 maxaabiis ah** ayaa la siiyay agabka shakhsiyadeed ee aasaasiga ah si loo hagaajiyo xaaladaha nolol maalmeedka.
- **3,761 detainees** ayaa ka faa'iideystay dayactir lagu sameeyay nidaamyada biyaha, jikooyika iyo meelaha furan ee **8 xabsi**.
- **15,791 detainees** ayaa ka faa'iideystay deeqda dawooyinka aasaasiga ah iyo agabka dhawwacyada lagu dhayo xaruamaha caafimaadka ee **5** xabsi. Intaa waxaa dheer, **1,834 maxaabiis ah** oo qaba nafaqo-daroo ba'an iyo mid dhexdhexaad ah ayaa helay daweyn.

**5,102 Maxaabiis ah**

ayaa xaaladdooda lala socday iyada oo loo marayo **56** booqasho oo lagu tagay **20** xabsi, oo ujeedadoodu tahay hagaajinta xaaladaha iyo la dhaqanka maxaabiista.

## Ilaalinta dadka yayidka ah

- **143 dhacdooyin colaadda la cxiriira ah** ayey ICRC diiwaangalisay. Arintaa oo ay ka dhalatay:
  a. **102 qof** ayaa helay kaalmo si looga caawiyo ka soo kabashada saameynta colaadda hubeysan ama rabshadaha.
  b. **92 qof** ayaa loo diray hay'ado aan saaxiib nahay si ay u helaan adeegyada ay u baahanyihiin.
  c. ICRC-da **71 dhacdo** la soo qaaday **28 masuuliyiin ah** intii ay socdeen **53 kulamo shacabka lagu matalayay ah**, iyada oo la raadinayo xaqiijinta kiisas iyo dhacdooyin la aaminsanyahay in ay xadgudub ku yihiin sharciga caalamiga ah ee bini'aadamnimda (IHL) iyo baaqa horumarinta ilaalinta dadka rayidka ah. Ujeedka ayaa ahaa in magdhow loo helo dhibbaneyaasha lagana hortago dhacdooyinka mustaqbalka.

**143 Dhacdooyin colaadda la cxiriira ah**

ayey ICRC diiwaangalisay.

## Ilaalinta xiriirka qoyska

- Soomaaliyeed (SRCS), ayaa **47,408 oo ah Farriimaha Laanqayrta Cas** la isweydaarsaday, **138,216 wicitaano taleefan oo bilaashna** la siiyay qoysaska kala lumay, iyo **1,170 codsiyo cusub oo raadin** iyo eedeymo xarig ahna la furay.

**138,216 wicitaano taleefan oo bilaasha ah**

ayaa la siiyay qoysaska kala lumay

**2,656 xubnood oo ka tirsan ciidamada qalabka sida iyo kuwa amniga** ayaa la baray sharciga caalamiga ah ee bini'aadamnimada iyo heerarka caalamiga ah ee uu boolisku u shaqeeyo marka laga hadlayo adeegsiga hubka intii ay socdeen 34 kulan oo dalka oo dhan ah, arintan oo lagu hagaajinayo ilaalinta dadka rayidka ah.

## Daryeelaka Caafimaadka Aasaasiga ah

# 353,851 bukaan

ayaa daryeelka caafimaadka aasaasiga ah ka helay **27 xarun caafimaad oo ay** SRCS maamusho. **2** ka mid ah xarumahan ayaa ahaa xarumaha caafimaadka guur guura oo la geeyay goobaha fog fog oo ay colaaddu saameysay.

## Nafaqo-darro

# 53,216 bukaan

ayaa lagu daryeelay barnaamijka Bukaan socod Eeegtada **11 xarun caafimaad oo ay** SRCS maamusho. **38,838** caruur ah oo ka yar da'da 5ta sano iyo **14,378 oo ah dumar uur leh iyo kuwo nuujinaya ayaa helay** plumpysup, cunto nafaqo leh oo dheeri ah, iyo boorash si wax looga qabto nafaqo-darrada.

## Daryeelka deg-degga ah

# 19,675 baaritaan

Ayaa laga sameeyay qeybta xaaladaha deg-degga ah ee Isbitaalka Madina, Isbitaalka Keysaney iyo Isbitaalka Guud ee Kismaayo. Dhammaan **3-da** isbitaal waxaa taageera ICRC.

## Xarunta Dajinta xaaladda bukaannada

# 1,999 Caruur ah

oo ka yar da'da 5-ta sano, oo qabay nafaqo-darro aa u ba'an, ayaa la jiifiyay laguna daweeyay Xarunta Dajinta xaaladda bukaannada ee Kismaayo.

## Dhaqan-celinta Jirka

# 9,754 Baaritaano ah

ayaa laga sameeyay dhammaan **3-da** xarumood ee dhaqan-celinta oo ay SRCS maamusho oo ku kala yaala Muqdisho, Gaalkacyo iyo Hargeysa.

## Qalabka Caafimaadka

# 24 isbitaal

ayaa taageero ka helay ICRC taa oo ay ku jireen 47 aha qalabka caafimaadka ee dhaawacyada hubka, oo suurogalisay daweynta 1,674 bukaan

## Gargaarka Deg-degga ah

# 10,338 qof

oo ay ku jiraa mutadawiciin SRCS ah iyo xubno ka tirsan bulshada ayaa qaatay gargaarka deg-degga ah. 445 ka mid ah ayaa ahaa kuwa hubka sita.

## Dhaqan-celinta Jirka

# 1 Xarun caafimaad oo cusub

ayaa SRCS looga dhisay Iskushuban, halka 3 xarun caafimaad oo kale laga dayactiray Muqdisho iyo Baydhabo.


Abdikarim Mohamed/ICRC

Xareeda Buulle, oo ah hawlwadeen ka tirsan ICRC, ayaa daqiiqad farxad leh kula qaadayneysa Xabiiba Cabdi suuqa Ansaloti ee Muqdisho. Xabiiba waxay maamushaa ganacsi yar waxayna tababar xirfadaha ganacsiga ku saabsan ka qaadatay ICRC arintan oo ka mid ah kaalmada lacagaha yar yar ee loo fidiyo qoysaska ay colaaddu saameysay.

## Hab-nololeedyada iyo gargaarka deg-degga ah

**229,128 qof** oo ay colaaddu saameysay ayaa lagu caawiyay taageero lacageed. Intaa waxaa dheer, **300 qof oo nugul** ayaa helay taageero lacageed arintan oo ka mid ah barnaamijka ilaalinta dadka rayidka ah (PCP).

**1,093 oo ah qoysas ay dumar hogaamiyaan** ayaa lagu caawiyay lacag si loogu taageero ganacsiyadooda yar yar.

**60 dhalinyaro ah** oo ka soo jeeda qoysas ngul oo barakacayaal ah ayaa lagu daray tababarka xirfadaha oo ku saabsanaa tubbooyinka, farayaamada iyo fuundinimo.

**26,976 beeraleey ah** oo ku dhaqan wabiyada jiinkooda ayaa helay deeq lacageed si loogu caawiyo soo nooleynta hab-nololeedkooda.

**195,608 qof** ayaa helay deeq ah jawaannada carrada si looga caawiyo yareynta sameynta fatahaadaha.

**250 xubnood** oo ka tirsan iskaashatooyinka beeraleyda ayaa helay abuur loogu talogalay soo sarista miraha aasaasiga ah.

**185 oo beeraley ah** ayaa lagu caawiyay dhismaha 2 bakhaar oo badarka lagu keydiyo oo laga dhisay Baarey iyo Doomacadde.

**132,462 qof** oo ku jira xeryaha barakacayaasha ayaa helay agabka gabbaadka laga dhigto oo ay ku jiraan bacaha roobka, saliyaal, iyo marooyin kaneeco, oo kaga yimid ICRC iyada oo loo marsiiyay SRCS.

229,128 qof

Oo ay colaaddu saameysay ayaa lagu caawiyay kaalmo lacageed. Intaa waxaa dheer, **300** qof oo ngul ayaa helay taageero lacageed arintan oo ka mid ah barnaamijka ilaalinta dadka rayidka ah (PCP).

132,462 qof

oo ku jira xeryaha barakacayaasha ayaa helay agabka gabbaadka laga dhigto oo ay ku jiraan bacaha roobka, saliyaal, iyo marooyin kaneeco, oo kaga yimid ICRC iyada oo loo marsiiyay SRCS.

Sanado colaado iyo dhibaatooyin dhanka cimillada oo soo noqnoqday ah oo dalka kadhacay ayaa qoysaska ku adkeynaya helitaanka biyo nadiif ah oo la cabi karo. ICRC-da ayaa bulshada Soomaaliya oo ay dhibtu gaartay ku caawisa qodista ceelal iyo dayactirka nidaamyada biyaha.



Abdikarim Mohamed/ICRC

## Fududeynta helitaanka biyo nadiif ah iyo nadaafad

**632,781 qof**

ayaa biyo nadiif ah ka helay **74** nidaamyada biyaha ah.

**97,529 qof**

ayaa helay agabka nadafaadda oo ay ku jiraan saabuun, kaniiniga biyaha iyo jirgaano, iyo macluumaad ku saabsan ka hortagga iyada oo looga jawaabayo cudurrada biyaha ka dillaaca iyo daacuunka **20** goobood Soomaaliya oo dhan.

**36,000 qof**

ICRC-da ayaa dhistay wabiga jiinkiisa si ay gacan uga geysato yareynta saameynta fatahaadaha, arintan oo ay ka faa'iideysteen **36,000** oo qof, iyo hawlo biyo saarid ah oo lagu caawiyay **34,800** oo qof oo **5** goobood ku kala sugan.

**Hawlo dayactir ah ayaa laga fuliyay isbitaallada ay ICRC taageerto:**
Isbitaalka Guud ee Kismaayo, Isbitaalka Keysaney iyo Isbitaalka Madina si loo hagaajiyo nidaamka biyaha iyo korontad.

# U xisaab celinta dadka ay dhibaatadu gaartay

- **18,092 kiis** oo ka socda dadka ay dhibtu gaartay ayaa la qaabilay lagana shaqeeyay iyada oo la adeegsanayo khadka bilaashka ah ee (373) goobo kala duwan oo Soomaaliya ah.
- La socoshada kaalmada ka hor oo loo sameeyay **49,237 ka faa'iideyteyaal ah** oo loo diiwaan galiyay kaalmo lacageed iyo barnaamijyada taageerada hab-nololeedka oo laga sameeyay gobollo kala duwan oo Soomaaliya ah, ayaa laga hirgaliyay Xarunta Wicitaanka, iyada oo **93% la xaqiijiyay**.
- **2,657 ka faa'iideysteyaal** deeq lacageed oo ujeedo badan ah iyo agabka hoyga ayaa lala xiriiray wajiga la socoshada kaalmada ka dib si loo xaqiijiyo in ay kaalmada heleen, iyada oo **99%** ay xaqiijeen in ay heleen.



Abdikarim Mohamed/ICRC

Colaadda ayaa wali ka mid ah waxyaabaha ugu badan ee barakaca sababa Soomaaliya. Qoysaska ayaa ka qaxa guryahooda iyaga oo taga xeryo ku yaala banaanka magaalooyinka, iyaga oo rajeynaya kaalmo bini'aadamnimo. Maanta, qiyaastii 3.5 milyan oo qof, oo ah ku dhawaad afar meelood meel shacabka, ayaa ku nool xeryaha barakacayaasha.


**Xafiiska ICRC Muqdisho**
Degmada Wadajir
Xaafadda Buulo-xuubey
Muqdisho
mog_mogadiscio@icrc.org

**Xafiiska ICRC Hargeysa**
Degmada Jig Jiga Yar
Ka soo horjeedka suuqa Cosob
Hargeysa
hag_hargeisa@icrc.org

**Xafiiska ICRC Kismaayo**
Fanoole isgoyska Qacle
ka soo horjeedka
Dhismaha Sadaam 2
Kismayo
kis_kismayo@icrc.org

**Xafiiska ICRC Garoowe**
Halgan Qeybta A
Lambar guri 0185
Wadada Jimcaale
Garowe
gar_garowe@icrc.org

**Xafiiska ICRC Baydhabo**
Dhabarka dambe siinka Somaphone
Wadada Muqdisho-Baydhabo
Baydhabo
bad_baidoa@icrc.org

**Xafiiska ICRC Jowhar**
Wadada airport-ka
Hantiwadaag
Laanta 2 ee Baryare
jow_jowhar@icrc.org

**Xafiiska ICRC Dhusamareeb**
Wadada Kadiye, Xaafadda Hodan
Dhabarka hoteelka BCQ
Dhusamareeb
dhu_dhusamareb@icrc.org

**Xafiiska ICRC Nayroobi**
Wadada Ngecha
Kabete Hoose
S.B 73226-00200
Nayroobi, Kenya
sok-nairobi@icrc.org

www.icrc.org
facebook.com/ICRCAfrica
twitter.com/ICRC_Africa
instagram.com/icrc_somalia
blogs.icrc.org/somalia


ICRC

© ICRC, March 2026

Cover photo: Abdikarim Mohamed/ICRC
2517 402 03 2026 1000